


# Fasalka 7aad

## HAGAHA HEERARKA QOYSKA EE MINNESOTA

Waxa Ardaygaaga Fasalka 7aad Loo  
Baahan Yahay Inuu Ogaado  
Howlaha iyo Tusaalooyinka ELA iyo Xisaabta  
Keeladaha loola Hadlo Macalimiinta



great  
MN  
SCHOOLS



# Waxyaabaha ku saabsan hagahaan



Qoysasku waxay doonayaan in ay ogaadaan waxa canuggoodu uu dugsiga ku barto. Waxay doonayaan in ay u doodaan canuggooda kana caawiyaan sidii uu ugu guulaysan lahaa dugsiga.

Waaxda Waxbarashada Minnesota waxay go'aamisaa waxa canug kasta uu ku baran doono dugsiga dhammaanba xiisadaha. Hagahaanu wuxuu kaa caawinayaa in aad fahamto heerarkaas oo kujira Faniga Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta. Arrintaani waxay kaa caawinaysaa in aad iskaashi la samaysato macalimiinta canuggaaga si aad waxbarashada uga taageertaan xiliga fasalka 7aad.

**Kahor inta aadan dib u eegis ku samayn hagahaan, waxaan kugu dhiirigalinaynaa in aad hubiso heerka fasalka uu canuggaagu hadda dhigto [belearninghero.org/readiness-check-mn](https://belearninghero.org/readiness-check-mn).**





## Hagahaan waxaa kamid ahs



**Waxa loo baahan yahay in canuggaagu uu ogaado uuna awood u yeesho in uu sameeyo-**

**BOGGA 4 EE ELA IYO BOGGA 16 EE XISAABTA**

Qaybta ugu muhiimsan (cilmiga iyo xirfadaha) ee ay ardaydu ku baranayaan dhammaadka fasalka 7aad



**Tusaalooyinka ELA-**

**BOGGA 8 EE ELA IYO BOGGA 19 EE XISAABTA**

Tusaale shaqada canuggaaga laga rabo in uu awood u yeesho in uu qoro dhammaadka fasalka 7aad



**Howlaha maalinlaha ah oo lagu taageerayo waxbarashada-**  
**BOGGA 14 EE ELA IYO BOGGA 21 EE XISAABTA**

Qaababka aad ku taageeri karto canuggaaga si uu u barto casharka muhiimka ah iyo xirfadaha ee kujira Faniga Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta



**Xeeladaha loola hadlo macalimiinta-**

**BOGGA 15 EE ELA IYO BOGGA 22 EE XISAABTA**

Qaabka adiga iyo macalinka canuggaagu aad u wada shaqayn kartaan si aad canuggaaga uga caawisaan koritaanka



**Ereybixinada ereyada Waxbarashada-**  
**BOGGA 23**

Qeexitaanada ereyada inta badan waxbarashada loo adeegsado ee khuseeya fasalka 7aad




## Faniga Luuqadda Ingiriisiga

### WAXA LOO BAAHNA YAHAY IN CANUGGAAGU UU OGAADO AWOODNA U YEESHO IN UU SAMEEYO

Fasalka 7aad, ardaydu waxay eegayaan waxa uu qoraagu sheegayo iyo qaabka uu wax u sheegayo. Ardaydu waxay isweydiyaan waxa qoraagu ku fakarayo, waxay raadshaan qodobada muhiimka ah ee kujira qoraalka, waxayna hubiyaan in waxa uu qoraagu sheegay ay yihiin wax sax ah iyo in kale. Waxay akhrin doonaan si ay wax uga bartaan ereyo cusub wax badanna uga bartaan dunida. Ardaydu waa in ay wax ka akhriyaan sheekooyinka bar khayaaliga ka ah barna dhabta ah. Buugaagtu waa in ay lahaadaan qadarka **adaygga qoraalka** oo kala duwan ayna baraan waxyaabo ku dad, goobo, iyo fikrado cusub, oo ay kujiraan codadka dadkii hore iyo kuwa hadda ahba ee Dakota & Anishinaabe.

Ardayda fasalka 7aad waa in ay inta badan wax qoraan. Waxa ay qori doonaan layliyo gaagaaban iyo layliyo dhaadheer kuwaas oo qaadan kara maalmo badan. Ardaydu waa in ay bartaan inta badan shuruucda hikaadda, naxwaha, iyo xarakaynta, iyo qaabka loo isticmaalo. Waa in ay si fudud wax u qoraan. Waxay ku tababaran doonaan cilmibaarista, fikirka, iyo dib u qorista ayada oo lagu salaynayo jawaab celinta ka imaanaysa macalimiintooda iyo ardayda ay isku fasalka yihiin. Waxay wax ka qori doonaan mowduucyo badan sababo kala duwan awgood.


Si aad u aragto dhammaan heerarka gobolka ELA ee fasalka 7ka fiiri halkan: [education.mn.gov/mde/dse/stds/ela](https://education.mn.gov/mde/dse/stds/ela)




**Ardayda fasalka 7aad waxay u baahan yihiin in ay ogaadaan sida howlaha hoose loo qabto marka la gaaro dhammaadka sannadka:**

**XIRFADAHA AKHRIS-QORAALKA**

- ✔ Waa in ay akhriyaan qoraalka heerka fasalka 7aad ah, kaasoo ah heerka Lexile 925-1185
- ✔ Waa in ay si wanaagsan u akhriyaan qoraalka fasalka 7aad, kaasoo ah 170 erey halkii daqiiqo
- ✔ Waa in ay akhriyaan ayaga oo tilmaamo bixinaya si ay u muujiyaan in ay fahmeen qoraalka marka ay akhriyaan
- ✔ Waa in ay qoraan ayna dib u qoraan curisyo kuwaas oo leh hikaad, naxwe, iyo xarakooyin sax ah
- ✔ Waa in ay isticmaalaan teknoolojiyadda si ay wax u qoraan ulana shaqeeyaan kuwa kale cilmibaarisna ugu sameeyaan mowduuc ayaga oo isticmaalaya ilo la isku haleyn karo
- ✔ Waa in aysan marna minguurin shaqada aysan ayagu lahayn, taasoo loo yaqaano **qish**
- ✔ Waa in ay fahmaan **raadkooda dhijitaalka ah**, kaasoo ah waddada xogta aan dhammaanteen kaga tagno internetka
- ✔ Waa in ay 38-40 erey ku qoraan halkii daqiiqo. Waa in ay ku qoraan ugu yaraan saddex bog halkii saac



## WAX KABARASHADA DUNIDA IYADA OO LA ADEEGSANAYO QORAAL

- 
- ✔ Waa in ay su'aalo weydiyaan kana jawaabaan qoraalka ay akhriyaan. Waa in ay dib u qoraan qoraalka si ay u helaan macluumaad gaar ah si ay u xoojiyaan fahamkooda. Waa in ay fahmaan micnaha xataa marka aan si toos ah loo sheegin. Waa in ay awoodaan samaynta waxyaabaha soo socda:
    - Waa in ay soo koobaan qoraalka ayaga oo aanan fikraddooda ku dhex darin
    - Waa in ay helaan mowduucyada, qodobada muhiimka ah, iyo fikradaha guud
    - Waa in ay bartaan sida qof muhiim ah, dhacdo, ama fikrad loo soo bandhigo iyo qaabka ay isu badalaan
    - Waa in uu sharraxaa qaabka qaybaha kala duwan ee qoraalku u saamaynayo micnaha
    - Waa in ay qeexaan qaabka sheekadu u socoto iyo qaabka jilayaashu uga jawaabaan
    - Waa in ay bartaan qaabka qoraaga iyo aragtidiisu u saamaynayso qoraalka
    - Waa in ay isu barbardhigaan sheekooyinka khayaaliga ah iyo kuwa taariikhda ah
    - Su'aalaa waxa qoraaga ama afkaarta qofka hadlaya uu soo qaato
    - Waa in ay ka fakaraan waxa qoraalku sheegayo. Majirtaa caddayn ku filan oo muujinaysa in fikraduhu yihiin kuwo sax ah?
  - ✔ Waa in ay helaan micnaha ereyo cusub iyo luuqadda sharraxaada, ayaga oo adeegsanaya fikradaha kujira qoraalka, mowduuca, qaamuusyada, ama ereyga asalka ah.
  - ✔ Waa in ay wax ka qoraan qoraalka kaddib marka ay akhriyaan. Waa in uu ku daraa hordhac leh jumlad soo koobid ah, tusaalooyin habaysan, iyo gabagabo
  - ✔ Waa in ay wax sharaxaan ayaga oo adeegsanaya qoraalkooda. Waa in ay isticmaalaan qaabab si ay naftooda u sharaxaan, oo ay kujirto isbarbardhig/ iska soo horjeedo, sababta/samaynta, dhibaataada/xalka, iyo xukmin. Waa in ay ereyo gaar ah ka qoraan oo la xiriira ujeedada. Waa in ay isticmaalaan ereyada isku xirka si ay fikrad ula xiriiriyaan.<sup>1</sup>

**Jean Baptiste de Lamarck and Charles Darwin were both naturalists that had theories about organisms getting helpful variations. Lamarck's theory was called the theory of acquired characteristics and Darwin's was called the theory of evolution by natural selection. Lamarck and Darwin's theories are the same and different in some ways.**


- ✔ Waa in ay qoraan fikrado lagu qanci karo. Waa in ay isticmaalaan qaabab kala duwan oo ay akhristaha ku qancin karaan. Waa in ay awoodaan ka jawaabidda isfahamwaaga.

**Dear Teachers,**

**I have recently begun learning about the “Shut Down Your Screen” week. This is a program where kids in school and out of school don’t use any electronics for one week. Everyone in your school would participate. This is a way to save the way we think and try something new. My question is, should we participate in the national “Shut Down Your Screen Week?” I think it would be a good idea for many reasons.**

**First, I think we should participate because using too much technology affects the way we think and behave. In the article Attached to Technology and Paying a Price by Matt Richtel it gives many scientifically proven facts that using technology too much affects the way we think. If you are juggling e-mail, phone calls and other incoming information it can lose people’s focus. Also as the text states, “The stimulation provokes excitement that researchers say can be addictive. In its absence, people feel bored.” This means that people can become addicted and when not using technology become bored with things they used to love to do.**

- ✔ Waa in ay wax qoraan si ay wax uga abuuraa uguna tarjumaan naftooda (gabay ahaan, sheekooyin, taariikh nololeedyo, khuraafaadyo, iyo ruwaayado). Waa in ay adeegsadaan wada sheekaysiyo, ereyo wax qeexaya, iyo 5ta dareen wade si ay u muujiyaan shucuurta jilaaga, yididiilada, iyo khibradaha. Waa in ay isticmaalaan qaabka saxda ah (sida, cutubka, baydadka, xalqooyinka) iyo ereyada gudbinta ee kala duwan si ay u muujiyaan khibradaha iyo isku xirnaanshaha dhacdooyinka.



<sup>1</sup>Muunadaha qoraalka ah ee la helay iyada oo fasax laga haysto Saaxiibada Ardayda. “Muunadaha Qoraalka Ardayda.” Achieve the Core, <https://achievethecore.org/category/330/student-writing-samples>



## TUSAALOOPYINKA ELA EE FASALKA 7AAD

Hoos waxaad ka helaysaa tusaale ku saabsan qoraal heerka fasalka 7aad ah.<sup>2</sup> Qoraalkaan wuxuu kujiraa heerka Lexile ee 1050. ardayda fasalka 7aad waa in ay awood u yeeshaan in ay si dagan u akhriyaan qoraalka iyo qaab tilmaamo leh. Intaa kaddib, waa in ay awood u yeeshaan in ay kuu sheegaan waxa ka dhacay qoraalka dhexdiisa kana jawaabaan su'aalaha hoose.

### **How Jackie Robinson Changed Baseball** **By Jessica McBirney** **2017**

Today, when you turn the TV to Major League Baseball, you will not be surprised at all to see an African American or Latino player take the mound. Maybe your favorite player is a person of color. But baseball has not always been as diverse as it is now. In 1947, Jackie Roosevelt Robinson became the first African American to play on a Major League Baseball team. The road he paved was an important, but difficult one.

#### *Early Athletic Success*

Robinson was born in Georgia on January 31, 1919, the youngest of five children. His father left the family just a year later, and his mother moved her children to Pasadena, California. She worked odd jobs to support her family, but Robinson still grew up in relative poverty.

When Jackie enrolled in high school, his siblings encouraged him to get involved in school sports teams. He excelled in football, basketball, track, and baseball. He broke many school sports records. Robinson continued to play all of these sports in junior college. Ironically, he viewed baseball as his weakest sport. He transferred to UCLA to complete his degree, where he became the first athlete to letter 3 in all four of those sports. UCLA had some of the most racially integrated college sports teams at the time, but Robinson was still among a very small minority of non-white athletes on all his teams.

#### *Fighting Racism*

Even early in his life, Robinson confronted racism head on. In 1938, while still at junior college, he was arrested after disputing the police detention of one of his Black friends. He managed to escape a long jail sentence, but this and other run-ins with the police earned him a reputation as someone who was both eager and willing to stand up against racial oppression. When the U.S. entered World



War II, Robinson enlisted in the army. He never saw direct combat, but his military career was marred by racial problems. While stationed in Texas, Robinson boarded a non-segregated bus, but he was instructed to sit in the back anyway. He refused, and military police took him into custody for his insubordination. Fortunately, one month later, an all-white jury acquitted him, but the situation was an early indication of the racial prejudice he'd come to face later in life.

### *A Negro Player with Guts*

Robinson joined the professional Negro Leagues to play baseball in early 1945. He signed with the Kansas City Monarchs and had great success, but he was frustrated by all the disorganization that plagued the Negro Leagues. At the time, a few Major League teams were recruiting from the Negro Leagues, and Robinson struck up a relationship with the General Manager of the Brooklyn Dodgers, Branch Rickey. Rickey liked the potential he saw in Robinson, but he had one question. He knew Robinson would face racial discrimination and injustice if he joined the Major Leagues. Could he be “a Negro player with enough guts not to fight back?” Robinson promised that he could, and signed a contract with the Montreal Royals, the Dodgers’ top minor league team. After just one season, he transferred to the Brooklyn Dodgers. As he stepped onto the field as first baseman in 1947, Jackie Robinson became the first Major League Baseball player to break the color barrier since 1880. He was 28 years old. African-American fans flooded to Dodgers games, and even the general public and the press had a mostly positive view of the team’s newest addition. However, Robinson faced discrimination from a few of his own team members, who threatened to sit out of games if he was allowed to play. Management took Robinson’s side — “I say he plays,” said the manager. “I say he can make us all rich. And if any of you cannot use the money, I will see that you are all traded.” Other teams also disliked Robinson’s admittance into the League. Many threatened not to play against him. Most managers rejected these threats and forced the players to participate anyway. Instead, they took it out on Robinson directly during the games. Some players were physically violent — he once received a 7-inch gash in his leg from an opponent who spiked him with his cleats — while others hurled verbal racial insults at him and his teammates. The racism from other teams only united the Dodgers, however, and the team grew more accepting of him.

<sup>2</sup>“Sida Jackie Robinson Wax Uga Beddelay Kubada Baseball-ka” ee ay qortay Jessica McBirney. Xuquuqda lahaanshaha © 2017 ee CommonLit, Inc. Qoraalka waxaa ruqsad lagu siiyey CC BY-NC-SA 2.0

### *Major Success*

Robinson won Rookie of the Year in 1947. In later seasons, more African-Americans joined other teams in the Major Leagues, as Robinson continued to excel. His success gained him fans from all over the country. He started at second base for the National League in the 1949 All-Star game, and he helped the Dodgers win the 1949 National League pennant. Over the next several years his success grew, and by 1955 the Dodgers pulled out a win in the World Series. Robinson was 36 and starting to feel the effects of his age. In 1956 he did not dominate the league as much as he used to, partially because of the adverse effects of the diabetes he suffered from. When the Dodgers traded him to the New York Giants, Robinson decided to quit baseball altogether and become an executive for a coffee company instead. A Legendary Impact After his retirement, Robinson remained a baseball legend. In 1962, he received baseball's highest honor when he was elected into the Hall of Fame. His playing style changed many team strategies. For example, he inspired players to be more aggressive in their base-running, rather than relying only on the distance they could hit the ball.

Robinson also made important racial breakthroughs in the sports world. The first baseball player to break the color barrier in 60 years, he paved the way for many future African-American and minority athletes. His career helped the upcoming Civil Rights Movement by giving Americans a heroic African-American sports figure to rally around.



## SU'AALAHA FAHAMKA KU SAABSAN

Waa in ay ka jawaabaan su'aalaha soo socda, ayaga oo isticmaalaya caddaymo ka imaanaya qoraalka si ay jawaabahooda ugu xoojiyaan.

1. Isubarbardhig oo kala saar Robinson noloshii xiligiisii hore iyo xirfaddiisii danbe.
2. Sidee ayuu Jackie Robinson kaga gudbay cunsurinimada uu wajahay (noloshiisa iyo kubada baseball) inkasta oo loo sheegay in uusan dib ula dagaalin?
3. Waa in ay qeexaan khibraddii Robinson intii uu ciyaartoyga ka ahaa horyaalka Major League Baseball.
4. Sida guulaha Jackie Robinson ka gaaray kubadda baseball-ka uga dhigto halyay dad fara badan?
5. In ay qeexaan saamaynta Robinson ay ku yeeshaan Dhaqdhaqaaqii Xaquuqaha Madaniga ahaa.



Hoos waxaad ka helayaasa tusaale ku saabsan qoraal heerka fasalka 7aad ah.<sup>3</sup>

## The Boy

The young boy stood with the most menacing look he could muster spread across his face. He just stood there watching the endless columns stretch as far as the eye could see down the long, dusty road. The soldiers would turn and look as they went by, and he made sure to look right back. He made sure to stare as far as he could into the dark pupils of their eyes, as if it would raise the house that was now nothing more than a heap of ashes. Only a few charred remains of the walls were left.

**Wuxuu barayaa akhristaha jilaaga muhiimka ah iyo goobta sheekada**

**Wuxuu isticmaalayaa ereyo gaar ah, tafaasiil wax qeexda, iyo luuqadda sharaxaada (“mas weyn oo seyn buluug ah leh”)**

As his eyes went from soldiers to remains he saw a small soft lump poking up from the ashes. He knew exactly what it was and he turned away. That teddy bear had been his favorite friend. Not a toy, it was more than a toy to him. For a second he was back on a green lawn, with the shutters of a house tapping softly on the window pane. And there was his bear. They waited for the next pirate ship to come around the bend in the road, so they could board it and make the captain walk the plank.

**Wuxuu isticmaalaa ereyada gudbinta si uu u muujiyo dib u xasuusashada wakhti hore (xasuus). Wuxuu isticmaalaa ereyo si uu u qeexo xasuusta wiilku noloshiisii uu soo maray kahor inta uusan askartu imaan**

But then he heard a shout and knew he was back on the dusty road with no green lawn and no shutters tapping softly.

**Qoraagu wuxuu qaabeeyay habayn adag taasoo u bilaabanayso si dabiici ah (inkasta oo aysan ahayn hab wakhtiga ku beegan)**

He leaped down from his perch on an old dresser, one of the few things that hadn't been pillaged or burned in the fire. He bent down, putting both hands on his knees as his eyes searched the ground intently. He picked up the most deadly rock he could find and hopped back up on his perch to resume his watchful glare. No soldier escaped the watchful eyes as he probed them. The giant snake of blue tails was tapering off, and the boy could now see the end of the tail. The boy

**Wuxuu isticmaalayaa ereyo gaar ah, tafaasiil wax qeexda, iyo luuqadda sharaxaada (“mas weyn oo seyn buluug ah leh”)**

<sup>3</sup>Muunadaha qoraalka ah ee la helay iyada oo fasax laga haysto Saaxiibada Ardayda. “Muunadaha Qoraalka Ardayda.” Achieve the Core, <https://achievethecore.org/category/330/student-writing-samples>

once again hopped down from his perch. He could feel the sweat-covered rock in his palm. The last of the blue columns were passing.

The boy took a step forward and leaned back, then whipped his body forward and released the rock at the same moment. The boy heard a thud as the rock came home and the rear most soldier clutched his side and looked back – but all he saw were those hateful eyes with tears rolling forth.

Wuxuu bixiyaa gabagabada  
la socota wuxuuna ka  
tarjumaa dhacdooyinka





## HOWLAHA MAALINLAHA AH EE LAGU TAAGEERAYO WAXBARASHADA

★ **Haddii ardaygaaga fasalka 7aad uu sheegi waayo ereyada, ama haddii uu ku istaago marka uu akhrinayo, kala hadal macalinkiiisa akhriska faseexiisa. Sidoo kale, canuggaagu haku tababarto akhrinta qoraalada yaryar si uu usoo wanaagsanaado, sida gabay-yada iyo sheekooyinka gaagaaban**

- U sheeg ardaygaaga fasalka 7aad in uu doorto buugga uu doonayo in uu iskiis u akhristo maalin walba. In uu buugaag badan in muddo ah ku akhriyo waa muhiim. U ogolow canuggaaga in uu doorto, si uu ugu faraxsanaado wax akhriska
- Taga maktabadda Ismaamulka Hennepin mar kasta - waa bilaash! Qof kasta waxa uu heli karaa kaarka maktabadda, ayada oo aan loo eegayn marxaladdiisa soogalootinimo
- Doorta wax mowduuc aad isla barataan. Isla akhriya buugaagta, onleenka wax iskala fiiriya, ama isla sameeya hawlo gaagaaban oo cilmibaaris ah. Weydii waxa uu ku bartay akhriskiisa. Hakula wadaago adiga, saaxiibada, ama xubnaha kale ee qoyska
- U sheeg canuggaaga in uu ku tababarto qoraalkiisa. Wuxuu haysan karaa joornaal, wuxuu qori karaa waraaqo ama iimaylo, ama wuxuu qaadan karaa xusuus qoraalo ku saabsan waxa uu baranayo
- Isla dhagaysta warbixinada kana sheekaysta ama wax ka qora waxa aad barateen
- Tus ardaygaaga fasalka 7aad qaabka uu u isticmaali karo waxa uu dugsiga ku barto nololsha danbe:
  - Weydii saaxiibada iyo qoyska in ay ardaygaaga fasalka 7aad tusaan qaabka uu u isticmaali karo waxyaabaha uu ku bartay dugsiga
  - Tag fasalka wax qorista ee xarunta bulshada
  - U sheeg canuggaaga in uu si mutadawacnimo ah u tago dhacdooyinka iyo howlaha bulshada
- Kala hadal koleejka ardaygaaga fasalka 7aad. Fiiri waxa aad u baahan tahay in aad adeegsato si aad koleejka u tagto. Tus ardaygaaga dugsiga dhexe sida waxbarashada uu hadda qaadanayo ay ugu diyaarinayso dugsiga sare iyo koleejka
- Sii canuggaaga shaqooyin todobaadle ah oo ka dhigaya in uu wax akhriyo sida cunto karinta, dukaamaysiga, iyo diyaarinta iimaylada
- Samee jadwal guriga ah kuna dhaqan. Xaqiiji in canuggaagu maalin walba dhammeeyo layliga guriga



## XEELADAHA LAGULA HADLO MACALIMIINTA

1. Ma i tusi kartaa natiijooyinka qiimayntii ugu danbaysay ee wax akhriska canuggayga?
2. Muxuu ardaygayga fasalka 7aad dhigto uu ku wanaagsan yahay, sideese ugu isticmaali karaa xirfadahaan fasalka dhexdiisa?
3. Qaabkee u dooranaysaa waxa fasalku akhrinayo? Ardaygayga fasalka 7aad ma arki doonaa wajiyada iyo goobaha uu buugaagta ku bartay? Muu ka baran doonaa dad iyo goobo cusub?
4. Maxay ardayda fasalka 7aad baranayaan marka ay wax akhrinayaan? Muxuu ardaygayga fasalka 7aad uu awood u yeelan doonaa in uu fahmo kana hadlo ayada oo lagu salaynayo waxa uu ahriyay? Waa maxay mowduucyada uu ka akhriyo taariikhda iyo sayniska?
5. Ardaygayga fasalka 7aad ah isagu ma doortaa in uu akhristo buugaagta uu isagu danaynayo? Kaliya ma waxaa loo ogolyahay inuu akhriyo buugaagta aad adigu u doortay? Ma waxaa kaliya loo ogolyahay in uu doorto buugaagta leh heer akhris oo cayiman? Muu awoodaa in uu akhriyo waxyaabaha ka caawinaya fasalka uuna xiisaynayo?
6. Ardaygayga fasalka 7aad ah muu awoodaa in uu wax u qoro qaab ku tusaya in uu yaqaano waxa uu akhrinayo iyo waxa uu baranayo? Ma uu adeegsadaa tusaalooyinka qoraalka iyo tafaasiil ku filan? Ma uu adeegsada hikaadda, naxwaha, iyo xarakaynta saxda ah? Haddii uusan adeegsan, sideen u caawin karaa?
7. Ilaa intee ayuu canuggaygu wax qoraa halkii xiisad ee fasalba? Qaabkee ayuu jawaab celin kuhelaa muraajicaynna loogu sameeyaa wixii uu qoray?
8. Ma haysaa wax tusaalooyin ah oo qoraalka canuggayga ah? Canuggaygu majiraan waxyaabo uu dib u qoray?
9. Ardaygayga fasalka 7aad ma awoodi karaa in uu ku hadlo waxna dhegaysto fasalka dhexdiisa taasoo muujinaysa in uu fahmayo waxa uu baranayo? Miyuu adeegsadaa caddayn ka socota qoraalka, jawaabihiisa ma usoobandhigaa si faahfaahsan, mana u hadlaa qaab qotodheer si uu u muujiyo in uu wax fahmayo? Haddii aysan sidaa ahayn, waa maxay caqabadaha uu wajahayo?
10. Maxaan samayn karaa si aan u taageero ardaygayga fasalka 7aad ah fasalka dhexdiisa? Qaabkee ayuu u dhisi karaa xiriir xooggan oo uu kula yeesho una qaadan karaa mas'uuliyadda waxbarashada?



# Xisaabta

WAXA LOO BAAHNA YAHAY IN CANUGGAAGU UU  
OGAADO AWOODNA U YEESHO IN UU SAMEEYO

Fasalka 7aad, ardaydu waxay diiradda saarayaan xalinta mas'alooyinka wata **saamiga** iyo **xiriirka saamigalka**. Waxay sidoo kale adeegsadaan **astaamaha aljebra** ee **tibxaha** waxayna xaliyaan noocyo kala duwan oo mas'alooyin ah oo wata **tirooyinka lakabka ah**. Ardaydu waa in ay isla shaqeeyaan xiliga fasalka, ka wada hadlaan qaabka ay u xalinayaan mas'alooyinka, oo midkood kan kale wax ka barto. Ardayda fasalka 7aad waa in ay sameeyaan dood xisaabeed iskuguna dayaan qaabab kala duwan si ay mas'alooyinka u xaliyaan. Waa in ay xaliyaan labadaba mas'alooyinka kuwa tirada ah iyo kuwa ereyada ahba, oo ay kujiraan mas'alooyinka dhabta ah ee dunida laga adeegsado. Ugu danbayntii, waa in ay qiyaasaan xalalka kahor inta aysan xallin ogaadaanna in qiyaastoodu tahay mid maangal ah iyo in kale. Ardayda fasalka 7aad waxay wakhtigooda inta ugu badan ku bixin doonaan barashada mawduucyada soo socda. Waa in ay si wanaagsan u fahmaan marka la gaaro dhammaadka sannadka

Si aad u aragto dhammaan heerarka xisaabta gobolka ee fasalka 7ka fiiri halkan: [education.mn.gov/MDE/dse/stds/Math](https://education.mn.gov/MDE/dse/stds/Math)



## BARASHADA XISAABTA FASALKA 7AAD

- ✔ Waa in ay taxliiliyaan xiriirada **saamigalka** ayaga oo isticmaalaya shax ama jaantuus ku qoran **baraha kulanka sallaxa**. Waa in ay sheegaan farqiga u dhexeeya xiriirka saamigalka iyo kuwa aanan ahayn
- ✔ Waa in ay isticmaalaan saamiyo si ay u xaliyaan mas'alooyinka talaabooyinka badan leh:
  - Sicirka unugga  
**Raul wuxuu 468 mayl ku socday 2 maalmood gudahood asaga oo ku socday xawaare celcelis ahaan gaaraya 52 mayl halkii saacba. Maalintii koowaad, wuxuu safray 4 saacadood asaga oo ku safray xawaare gaaraya 62 mayl halkii saacba. Muxuu ahaa celceliska xawaaraha Raul maalinkii labaad ee safarkiisa?**
  - Isirada iskeelka, saamiga dheerarka, iyo saamiga bedka  
**Haddii laba laydi oo iskumid ah ay leeyihiin joogag 3 iyo 5 ah, laydiga koowaadna uu leeyahay sal dherarkiisu yahay 7, waa maxay dherarka salka laydiga kale?**
  - Sawiridda iskeelka iyo cabirada qiimo isu badalidda  
**Adiga oo adeegsanaya heerka qiimo isu badalidda 1 km = 0.62 mayl, imisa kiilomitir ayaa kujirta 26.2 mayl?**
  - Dulsarka, canshuurta, qiimaha , qiime kororka iyo qiime dhimista, xeeladaha iyo khidmadaha  
**Sandra waxay buug kusoo iibsatay 25% qiime ka yar qiimihisii hore. Haddii ay ka bixisay \$16.50 si ay buuga usoo iibfato, muxuu ahaa qiimihii hore ee buugga?**
- ✔ In ay fahmaan **tirooyinka lakabka ah**, isubarbardhigaan, ay ku qoraan baraha kulanka sallaxa. Waa in ay isticmaalaan **nidaamka xisaaf-falada** iskugu daraan, u kala jaraan, iskugu dhuftaan, una qaybiyaan lambarrada lakabka ah
- ✔ Waa in ay adeegsadaan **astaamaha aljebra** si ay u qoraan dibna ugu qaabeeyaan **tibxaha isle'eg**. Waa in ay qiimeeyaan tibxaha leh tirooyinka **qiimaha sugan**, iyo **ku jibaaraneyaasha** tirooyinka idil

$$\frac{1}{3}(2x-5)^2 \text{ oo } x = 5$$

- ✔ Waa in ay xaliyaan mas'alooyinka dunida dhabta ah iyo xisaabta ayaga oo adeegsanaya **isle'egyada** iyo **isma le'egyada** ku taxaluqa **doorsoomeyaasha** iyo  **tirooyinka lakabka ah** kuwa taban iyo kuwa togan

**Miguel wuxuu riixay kartoona caano ah waxaana daatay 3 koob oo caano ah kahor inta uusan kartoona kii toosin mar labaad. Markii Miguel uu ku shubay caanihii ku haray si isle'eg laba koob oo wax lagu cabiro, waxaa koob kasta kujiray koob 3/4 oo caano ah. Imisa caano ah ayaa kujiray kartoona markii hore?**

- ✔ Xali isle'egta labada talaabo ah ee la xiriirta tirooyinka lakabka ah iyo ku jibaaraneyaasha


$$x + 4\frac{1}{6} = \frac{2}{3} \quad \text{then} \quad x = ?$$


- ✔ Xali mas'alooyinka ku saabsan dunida dhabta ah ee la xiriirta cabirada xaglaha, bedka, meeriska goobada, iyo mugga. Waa in ay sharaxaan qaacidooyinka ay isticmaaleen
- ✔ Waa in ay isticmaalaan qiyaas xisaabeedyada si ay u sameeyaan qiyaasaha ku saabsan shucuubta marka la bixiyo muunad ku nasiibsi ah
- ✔ Waa in ay soo helaan ixtimaalka waqdhacyada fudud iyo kuwa isku dhafan, waa in ay qoraan ixtimaalada jajabyada, jajab tobanleyaasha, iyo boqleyda

**Ixtimaalka in laandhuu la tuuro kaddibna la helo '3" waa waqdhac ixtimaal oo fudud ixtimaalkuna waa 1 6dii jeerba ama 1/6**



**Ixtimaalka in halmar la tuuro laandhuu lana helo "3" sidoo kalena la tuuro shilin lana helo "xarash" waa waqdhac isku dhafan ixtimaalkuna waa 1/6 x 1/2 kaasoo ah 1 12kii jeerba ama 1/12**






## TUSAALOYINKA XISAABTA FASALKA 7AAD

Hoos waxaa kujira tusaalooyinka mas'alooyinka xisaabta ee heerka fasalka 7aad.<sup>4</sup>

1. Waa maxay qiimaha  $4^3$
2. hal kayar laba jibaarka tiro,  $x$ , waa 27. Qor isle'eg loo isticmaali karo sidii loo heli lahaa qiimaha  $x$ .
3. Dherarka iyo ballaca sawir cabirkiisu yahay 8-inji iyo 12-inji ayaa mid kasta laga yareeyey 50%. Haddana mar labaad ayaa laga yareeyey 25%. Waa maxay masaafada meeriska sawirka cusub?
4. Tirooyinka soo socda kee baan ahayn lakab?
  - a.)  $\frac{3}{9}$
  - b.) 0.39
  - c.)  $\overline{3.3939}$
  - d.) 3.393993999....
5. Garaaf ku muuji xalka  $|x|=3$  xariiqa tirada ee toosan.
6. Masaafada Jan ay safrayso 2 saacadood gudahood waxay 18 mayl ka badan tahay masaafada ay 0.5 saacadood ku safarto. Masaafada ay safartaa waxay saamigal ku tahay wakhtiga. Imisa mayl ayay Jan ku safartay 2 saacadood gudahood?
7. Bedka oogada dhululubadu waa 175.8 sintimitir oo laba jibbaaran.



Waa maxay joogga dhululubadu? (U isticmaal 3.14 badalka  $\pi$ )

- a.) 2.3 sintimitir
- b.) 3.0 sintimitir
- c.) 3.5 sintimitir
- d.) 4.5 sintimitir

<sup>4</sup>Waxyaabaha laga soo daayay Qiimeynta Dhammaystiran ee Minnesota. Xaquuqda lahaanshaha MDE <https://education.mn.gov/MDE/dse/test/items/>

8. Macalin ayaa qortay dhibcaha warbixinta buugga ee qaar kamid ah ardayda fasalkeeda ayada oo isticmaalaysa dhibcaha laga bilaabo 1 ilaa 100.

95 75 88 82 60 89 95 73

Macalimada waxa u hartay 1 buug oo dhibcaha warbixinta in ay qorto. Waa maxay dhibcaha ka dhigaya celceliska iyo dhexfurka dhibcaha kuwo iskumid ah?

9. Isle'egtee utaagan xiriirka saamigalka?

a.)  $y = \frac{5}{x}$



b.)  $y = \frac{1}{6}x$

c.)  $y = 3x + 1$

d.)  $x^2$

10. Cayaar ayaa isticmaasha laba wareege kuwaa oo leh qaybo midabkoodu yahay buluug (B), casaan (R), iyo jaalle (Y). Ixtimaalka in buluug laga helo labada shey ee wareeganayaba waa  $\frac{1}{6}$ . Ixtimaalka in casaan laga helo labada shey ee wareeganayaba waa  $\frac{1}{6}$ . Waa maxay midabka qayb kasta oo wareegaha ah? Ku qor B, R, ama Y bokiska ku beegan.

B R Y



Furaha jawaabta ee bogga 21.



## HOWLAHA MAALINLAHA AH EE LAGU TAAGEERAYO WAXBARASHADA

★ ***Kala hadal ardaygaaga fasalka 7aad xisaabta uu samayn karo. Waa maxay waxyaabaha cusub ee uu baranayo? Wax dhibaato ah miyuu ku qabaa? Ma caawin kartaa adigu?***

- Marka ardaygaaga fasalka 7aad uu u baahdo in laga caawiyo layliga, weydii su'aalaha ka caawinaya in uu barto qaabka loo xaliyo mas'alada. Adigu ha uga shaqayn mas'alada
- Ka caawi ardaygaaga fasalka 7aad helitaanka waxyaabaha ka caawin kara waxbarashada. U sheeg ardaygaaga in uu kala hadlo macalamiintiisa waxyaabaha caawin kara, sida in uu ku tababarto shaqooyinka, caawimaadda, ama ilo kale
- Canuggaagu haka hadlo waxyaabaha ay baranayaan iyo halka ay waxyaabaha ku arkaan ee dunida ku wareegsan. Tusaale ahaan, halkee ayay ku arkaan tirooyinka taban ee kabaxsan fasalka xisaabta?
- U kaxee canuggaaga dukaamaysiga. Weydii in uu isbarbardhig ku sameeyo qiimeyaasha si uu u helo iibka ugu wanaagsan. Weydii in uu qiyaaso canshuurta
- Wax ka weydii ardaygaaga fasalka 7aad mas'alooyinka xisaabta ah ee uu doonayo in uu xaliyo. Miyuu u isticmaali karaa xisaabtaan shaqadiisa marka uu weynaado?
- Weydii ardaygaaga fasalka 7aad in uu sameeyo cilmibaaris xog xisaabeed ah oo ku saabsan qaybaha uu danaynayo. Tusaale ahaan, u sheeg in uu soosaaro 30ka heesood ee ugu badan ee uu dhagaystay bishaan. Hel faraqa, celceliska, iyo badi-dhecaha ugu badan ee uu dhagaysto ee heesaha
- Tus meelaha aad xisaabta u isticmaasho noloshada maalinlaha ah

### **FURAHA JAWAABTA**

**1:** 64; **2:**  $2x - 1 = 27$ ; **3:** 15 pulgadas; **4:** D: 3. 393993999...; **5:** dhibcaha waa in ay ahaadaan -3 iyo 3 iyagoo kujira laynka iskuxidhaya; **6:** 24 miles; **7:** 3.0 sintimitir; **8:** 88; **9:** B.  $y = 16x$ ; **10:** Jawaabuhu way kala duwanaan karaan.





## XEELADAHA LAGULA HADLO MACALINKA

1. Ma i tusi kartaa imtixaankii xisaabeed ee ugu danbeeyay ee canuggayga?
2. Waa maxay mowduucyada ugu muhiimsan ee ay ardayda fasalka 7aad ka bartaan xisaabta? Canuggaygu ma fahmayaa ashyaada? Ma la wadaagi kartaa tusaalooyin gaar ah?
3. Qaabkee canuggaygu u wajahaa shaqooyinka xisaabta ee adag? Sidee ayaan u caawin karaa marka uu wajahayo mas'alooyin adag?
4. Waa maxay waxyaabaha loo baahan yahay in canuggaygu fahmo kana hadlo ee waxyaabihii uu bartay?
5. Canuggaygu ma i tusi karaa in uu fahmay waxa uu bartay? Haddii aysan sidaa ahayn, maxaa caqabad ku ah? Sidee ayaan u caawin karaa?
6. Qaabkee ayaan ku taageeri karaa kuna dhiirigalin karaa ardaygayga fasalka 7aad si uu waxbarashadiisa u maamusho?





## Erey bixinada ereyada waxbarashada

Macalimiintu waxay adeegsadaan ereyo micno gaar ah leh marka ay dugsiyada joogaan. In aad ereyadaas fahamto waxaykaa caawinaysaa in aad macalinka canuggaaga la hadasho.

### QIIMAHA SUGAN




Masaafada lambar uu kasoo bilaabmo eber. Calaamadda "I" ayaa la dhigaa labada dhinac ee tirada si loogu micneeyo qiimaha sugan, sidaa darteed qiimaha sugan ee x waxaa loo qoraa  $|x|$ .

$$|4| = 4 \quad |-5| = 5$$

### MEERISKA GOOBADA




Meerisku waa masaafada qaab ku wareegsan. Waxaa lagu helo iskudarista dhererka dhinacyada oo dhan. Marka la eego goobo, meerisku wuxuu s aamigal u yahay dhexroorka isir ahaan.  $\pi$ .



### SALAXA BARAHA KULANKA



Baraha sallaxu waa sallax simman oo ay sameeyeen isgoyska xariiqa lambar taagan oo loo yaqaan dhidibka-y iyo xariiqa lambarka jiifa ee dhidibka-x. Kuwaani xariiqyada isku qotoma ee iska goynaya eber, bartaanna waxaa loogu yeeraa bar-boilowga.



### RAADADKA DHIJITAALKA AH



Macluumaadka ku saabsan qof kujira internetka oo ay sabab u tahay hawshiisa onlaynka. Arrintaan waxaa kamid ah baraha bulshada, sawiraanta, iibka onlaynka ah iyo dib u eegisyada, lambar sireedyada, iyo rukumashada, iyo noocyada kale.

## TIBXAHA ISU DHIGMA



Tibxaha isu dhigma waa tibxaha u shaqeeya qaab iskumid ah inkasta oo ay u muuqdaan in ay kala duwanyihiin. Haddii laba tibxood ay isu dhigmaan, haddaba labada tibxood waxay leeyihiin qiimo iskumid ah marka la galiyo qiimaha iskumidka ah ee doorsoomaha. Tusaale ahaan,  $2x + x + x$  waxay u dhigantaa  $4x$ .

## ISLE'EG



Waa jumlad laba shay isle'egyihiiin. Isle'egtu waxay inta badan leedahay laba tiro oo aan la garanayn (kuwaas oo loo yaqaano doorsoomeyaal) waxaana loo muujiyaa xaraf ahaan. Tusaale ahaan:  $3b + 5 = 14$ .

## KU JIBAARANE



Kujibaarane waxaa loola jeedaa inta jeer ee tirada asalka ah la isku dhufanayo.

$$\text{Salka } - 7^3 = 7 \times 7 \times 7$$

Ku jibaarane

## TIBIX



Tirooyinka, calaamadaha, iyo xisaab-falada (sida + & ) la isu keenay kuwaas oo muujinaya qiimaha shay. Tusaale ahaan,  $y + 4$  waa tibix, sidoo kale,  $3 - x/2$  iyaduna waa tibix.

## LUUQADDA SHARRAXAADA



Luuqadda sharraxaada waxay isticmaashaa qaybaha hadalka si ay u noqoto mid xiiso leh, waxtar leh, saamaynna leh. Tusaale ahaan: "Dhagorta eygaygu waxay u madowdahay sidii dhuxushii." "Waxay dareemaysaa buluug." "Wuxuu ku dagaalamay awood libaax." Ardayda fasalka 7aad waa in ay isticmaalaan mowduuca si ay u helaan micnaha luuqadda sharraxaada ayna ogaadaan in ay tani ka duwan tahay micnaha dhabta ah ee ereyada.

## LEXILE



Waa hannaan heer u samayn oo caan ah oo ay adeegsadaan ardayda, macalimiinta, iyo waalidiinta si loo muujiyo laba shay:

1) Heerka wax akhriska ardayga 2) Adaygga qoraalka

Waxaad ka heli kartaa tirada Lexile qaybta danbe ee buugga ama adiga oo ciwaanka ka raadinaya [www.lexile.com](http://www.lexile.com). Heerarka lexile ee fasalka ku haboon:

Fasalka 6-8 heerka 925–1185



## HANNAANKA XISAAB-FALADA

Hanaanka xisaab-faladu waa xeer noo sheegaya nidaamka aan u xalinno tibxo talaabooyin badan leh. Nidaamka aan raacayno waxaa lagu xasuusan karaa ereyada lasoo gaabiyay ee PEMDAS:


1. **P**arentheses (Bilo)
2. **E**xponents (Ku jibaaraneyaasha)
3. **M**ultiplication & **D**ivision(Isku dhufasho iyo Isku qaybin) laga bilaabayo bidixda ilaa midigta
4. **A**ddition & **S**ubtraction(Kudar iyo Kajar) laga bilaabayo bidixda ilaa midigta

## QISH

Sheegashada shaqada qof kale ama fikraddiisa in aad adigu leedahay.

## ASTAAMAHA ALJEBRA

Astaamaha aljebra waxay qeexayaan qaababka kala duwan ee tiro la iskugu keeni karo. Ardayda fasalka 7aad waa in ay u fududaataa adeegsiga astaamaha aljebra ee isu soocidda, isu aruurinta iyo kala soocidda.

Astaanta	Sharaxaad	Tusaale
Isu soocidda	Badalidda kooxaynta bisha ku dhexjirta ee walxaha aad isku darayso ma badalayso wadarta guud	$(-3 + 5) + 2$ waxay le'egtahay $-3 + (5 + 2)$
	Badalidda kooxaynta bisha ku dhexjirta ee walxaha aad isku dhufanayso ma badalayso wadarta guud	$(3 \times 5) \times -2$ waxay le'egtahay $-3 \times (5 \times -2)$
Isu aruurinta	Badalidda qaabka aad iskugu darayso walxuhu ma badalayso wadarta	$3 + 5 + 2$ waxay le'egtahay $2 + 3 + 5$
	Badalidda qaabka aad iskugu dhufanayso walxuhu ma badalayso wadarta	$3 \times 5$ waxay le'egtahay $5 \times 3$
Kala soocid	Marka aad walax aad walax kale ku dhufanayso kuwaas oo bil ku dhexjira la iskuna daray, waxaad kala sooci kartaa isku dhufsaanta labada walxoodba kaddibna waxaad isku dari kartaa taranta soo baxda   $a(b + c) = ab + ac$	$5(3 + 2) =$ $5 \times 3 + 5 + 2 =$ $15 + 10 =$ $25$

## XIRIIRKA SAAMIGALKA AH

Waa xiriir u dhexeeya laba caddad oo kala duwan kaasoo hal caddad uu yahay ma doorsoome kasoo tarmay caddad kale. Tusaale ahaan, quraanjo kasta waxay leedahay 6 lugood, sidaa darteed buulka quraanjada, wadarta tirada luguhu waxay lix jeer ka badan tahay tirada quraanjada. Sidaa darteed, tirada luguhu waxay saamigal ku tahay tirada quraanjada.

## IXTIMAAL

Waa suurtagalnimad uu shay ku dhici karo. Ixtimaalka waxaa lagu muujiyaa jajab tobanle ahaan ama jajab laga bilaabo 0-1 ama boqoley ahaan laga bilaabo 0-100%. Tusaale ahaan, ixtimaalka tuurista shilin iyo in uu soo baxo "xarash" waa .5, 1/2, ama 50%.


$$\text{Ixtimaalka waqdhaca} = \frac{\text{Inta jeer ee ay dhici karto}}{\text{Wadarta tirada natiijoyinka suurtagalka ah}}$$

## XIRIIRKA SAAMIGALKA AH

Waa xiriir u dhexeeya laba caddad oo kala duwan kaasoo hal caddad uu yahay ma doorsoome kasoo tarmay caddad kale. Tusaale ahaan, quraanjo kasta waxay leedahay 6 lugood, sidaa darteed buulka quraanjada, wadarta tirada luguhu waxay lix jeer ka badan tahay tirada quraanjada. Sidaa darteed, tirada luguhu waxay saamigal ku tahay tirada quraanjada.

## TIROOYINKA LAKABKA AH

Tirada lakabka ah waa tirada lagu muujin karo in uu yahay jajabka laba lambar. Tirada aan lakabka ahayn laguma muujin karo jajab ahaan. Jajab tobanluhu ma ahan tiro lakab ah haddii uusan waligiis dhammaanayn uusanna lahayn qaab soo noqonoqanaya.



## HEERKA AKHRISKA

Macalimiintu waxay inta badan cabiraan heerka akhriska ardayga, taasoo inta badan lagu calaamadeeyo xaraf ama tiro. Arrintaani waxay macalimiinta ka caawinaysaa in ay ogaadaan waxa ardaydu u baahan yihiin in ay bartaan. Laakiin mararka qaarkood, carruurta waxaa kaliya oo loo ogolyahay in ay akhriyaan qoraalada heerkooda ah. Ka digtoonow dhaqankan. Carruurta waa in aysan ku koobnaan kaliya akhriska qoraalada heerkooda ah ama ka hooseeya.

## ADAYGGA QORAALKA



Waa cabbirka ilaa heerka qoraalku adag yahay. Adaygga qoraalka waxaa lagu saleeyaa qodob badan. Qaabka qoraalka iyo xulashada ereyada ayaa adayg badan keeni kara. Qoraalku wuxuu noqonayaa mid aad u adag haddii akhristeyaashu u baahan yihiin aqoon dheeraad ah si ay u fahmaan micnaha, ama haddii qoraalku leeyahay micno adag.

## JUMLAD SOO KOOBID AH



Jumlad soo koobid ah waa hal ama laba jumladood oo soo koobaya fikradda guud ee qoraalka.

## DOORSOOME



Doorsoomu wuxuu u tagaan yahay qiimo tiro aan la aqoon oo kujira isle'eg ama tibix xisaab ah. Doorsoomeyaasha waxaa lagu muujiyaa calaamado (sida caadiga ah xaraf).


$$2x + 1 = 9$$

|  
doorsoome

## MUGGA



Caddadka goob 3 dhinac leh (3D) oo uu shay gali karo. Muggu wuxuu noo sheegayaa caddadka aan u baahanahy si aan shayga u buuxinno. Tusaale ahaan, caddadka biyaha loo baahan yahay si dhalo loo buuxiyo. Mugga shayga waxaan ku cabirnaa cabirro saddex jibaaran sida sintimitiro saddex jibaaran, injiyo saddex jibaaran, talaabo saddex jibaaran, iyo wixii lamid ah.



### TIXRAACYADA

Minnesota Department of Education Academic Standards <https://education.mn.gov/mde/dse/stds/>

Seek Common Ground Family Guides <https://seekcommonground.org/family-guides>

Math Milestone Grade Level Grids <https://www.mathmilestones.org/gradelevel-grids>



# QORAALO

Handwriting practice lines consisting of solid top and bottom lines with a dashed middle line, repeated multiple times.



Waxaa kuu keenay ururka aan  
faa'iido doonka ahayn, Dugsiyada  
Great MN. Ogow waxbadan & oo  
ugu deeq [greatmnschools.org](http://greatmnschools.org).

Nala wadaag waxa aad  
ku samaysay gaadkan!

